Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

# QARAAR GOLAHA SHACABKA

## KU SAABSAN

## KALSOONI SIINTA RA'IISAL WASAARE M.NE CABDIWELI SH. AXMED MAXAMED

**Muqdisho, 21ka Diseembar 2103**

## GOLAHA SHACABKA:

**Markuu Arkey:** Qodobka 69aad faqradiisa (2) (d) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya;

**Markuu Arkey:** Soojeedinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Lam. MJFS/Note 001GGSH/12/13 kuna taariikhsan 19/12/2013 oo Golaha soo gaartay 21/12/2013 kuna saabsan Soo Gudbin Magacaabis R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

**Markuu Dhageysatay:** Hadaljeedinta Ra'iisal Wasaaraha magacaaban M.ne Cabdiweli Sh. Axmed Maxamed";

### Qodobka 1-aad:

Iyada oo ay Golaha fadhiyeen 243 (Laba Boqol Afartan iyo Saddex) Xildhibaan. Golaha Shacabku wuxuu Kalsooni siinta Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya M.ne Cabdiweli Sh. Axmed Maxamed ku meelmariyey aqlabiyada 239 (Laba Boqol Sodon iyo Sagaal) Xildhibaan oo ayiday, 2 (Laba) Xildhibaan ka diiday iyo 2 (Laba) Xildhibaan oo ka aamustay.

### Qodobka 2-aad:

Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaan si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer Madaxweyne, si uu u Sharci u noqdo laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda si waafqsan Qodobada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo sida kmg ah loo ansixiyey.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka